JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

## WAR-SAXAAFADEED- FAAFIN DEGDEG AH

### SHIRWEYNAHA QARAN EE MAAMULKA IYO ISKU-DUWIDDA AMNIGA GUDAHA OO LAGU SOO GABAGABEEYAY MUQDISHO

Muqdisho, 2 Sebteembar 2026 — Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa maanta magaalada Muqdisho kusoo gabagabeysay Shirweynaha Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha, oo 1–2 Sebteembar 2026 lagu qabtay teendhada Afisyooni ee Garoonka Diyaaradaa ee Muqdisho, iyadoo halku-dhiggiisu ahaa "Xoojinta Maamulka qeybaha Amniga Gudaha." Shirweynuhu wuxuu diiradda saaray xoojinta maamulka iyo korjoogteynta hay'adaha amniga gudaha, sii xoojinta isku-duwidda hay'adaha amniga, iyo dhisidda hay'ado amni oo la awoodi karo bixinta kaharashaadkooda.

Shirweynaha qeybtiisa furitaanka waxaa khudbad ka jeediyay Wasiirka Amniga Gudaha, Mudane Jen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil, waxaana si rasmi ah u furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdulqaadir Maxamed Nuur (Jaamac). Shirweynuhu wuxuu isu keenay hay'adaha amniga ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, iyo wasaaradaha muhiimka ah ee dowladda, oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Difaaca, iyo Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, iyo bah-wadaagta caalamiga ah oo ay ka mid yihiin Hawlgalka KMG ah ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNTMIS) iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Taageerada iyo Xasilinta Soomaaliya (AUSSOM), iyo sidoo kale safiiro, khubaro amni iyo daneeyayaal kale.

**Labadii maalmood ee Shirweynaha, ka-qaybgalayaashu waxay ka qaybqaateen saddex kulan oo farsamo:**

**Kulanka Farsamo ee 1aad —** Korjoogteynta Hay'adaha Amniga Gudaha. Ka-qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen doorka Wasaaradda ee korjoogteynta Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (SPF), Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka (NISA), iyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (ICA). Waxaa sidoo kale looga hadlay habka warbixinnada loo gudbiyo, isla-xisaabtanka iyo dabagalka waxqabadka, iyo sida la isku waafajin karo madaxbannaanida hawlgallada iyo korjoogteynta ay sameeyaan Wasaaradda iyo Baarlamaanka.

**Kulanka Farsamo ee 2aad —** Isku-duwidda Hay'adaha iyo Wasaaradaha. Kulankan waxaa looga hadlay caqabadaha isku-duwidda ee Wasaaradda iyo hay'adaha hoos yimaada iyo qaab-dhismeedka guud ee amniga dalka. Waxaa si gaar ah diiradda loo saaray isku-duwidda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ee amniga gudaha, hababka isku-duwidda, kala caddeynta waajibaadka hay'adaha, iyo wadaagga xogta iyo sirdoonka.

**Kulanka Farsamo ee 3aad —** Dib-u-habaynta laamaha Amniga iyo daboolidda bixinta karashaadkooda. Ka-qaybgalayaashu waxay diiradda saareen dhisidda hay'ado amni oo la dabooli karo kharashkkooda islamarkaana muddo dheer jiri kara, sida tirada ciidamada, in la kordhiyo kharashaadka aku baxa mniga ee hadda jira, xaqiijinta maalgelin dhaqaale oo waarta, iyo yareynta ku-tiirsanaanta taageerada deeq-bixiyeyaasha si waafaqsan Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka (NSArch) iyo Qorshaha Horumarinta Hay'adaha Amniga (SSDP), iyadoo sidoo kale lagu salaynayo xaaladda kala-guurka hawlgalka AUSSOM.

**Tallaabooyinka Xiga**

Shirweynahani wuxuu astaan muhiim ah u yahay horumarka hay'adaha amniga Soomaaliya, isagoo ah shirweynihii ugu horreeyay ee si gaar ah loogu qabto amniga gudaha. Natiijooyinka kasoo baxay Shirweynuhu waxay muujinayaan sida ay hay'adaha amniga Soomaaliya uga go'an tahay xoojinta amniga gudaha ee dalka.

Si kastaba ha ahaatee, shaqadu kuma eka labadaan maalmood ee Shirweynaha; waxay hadda u gudbaysaa marxalad cusub, iyadoo la qaadayo tallaabooyin iyo hindisayaal gaar ah oo lagu doonayo in ballanqaadyadii iyo talooyinkii kasoo baxay Shirweynaha loo beddelo horumar la taaban karo oo waara oo laga sameeyo amniga gudaha Soomaaliya.

Intii uu Shirweynuhu socday, Wasaaradda Amniga Gudaha waxay muujisay inay diyaar u tahay inay hoggaamiso geeddi-socodkan. Ka qaybgalka hay'adaha iyo laamaha amniga Soomaaliya wuxuu sidoo kale muujiyay go'aan wadajir ah oo lagu doonayo in talooyinka kulamada loo beddelo tallaabooyin cad oo la fulin karo, si loo xoojiyo isla-xisaabtanka, isku-duwidda iyo awoodda hay'adaha ee guud ahaan laamaha amniga. Wadajirka iyo iskaashiga ka dhex muuqday Shirweynaha ayaa laf-dhabar u noqonaya dadaallada lagu xoojinayo hay'adaha amniga gudaha Soomaaliya, lana gaarsiinayo dhammaan shacabka Soomaaliyeed mustaqbal amni ahaan kan hadda ka wanaagsan, kana xasilloon.

Wasaaradda Amniga Gudaha waxay si kal iyo laab ah ugu mahadcelineysaa dhammaan hay'adaha dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, bah-wadaagta caalamiga ah, khubarada, iyo daneeyayaasha ka qaybgalay Shirweynaha, kuwaas oo ka qayb qaatay xoojinta maamulka iyo isku-duwidda amniga gudaha Soomaaliya.

— DHAMMAAD —